



لجنة أفريقية للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
أثر .. يبقى

الجسر الخيرية

CHARITABLE PATHS



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC

FEB 2022 - CADADKA 16 - DECEMBER, SOMALILAND

6 CEELBIYOOD OO LAGA QODAY MAGAALOOGIN KA
MID AH DAWLAD-GOBALEEDKA HIRSHABEELLE



15 Qoys oo Looga Faa'iideeyey Mashruuca Xoogsi Xalaal Ah

Agoonta Xarunta Kuweytiga oo Looga Faa'iideeyey Xoolo Sadaqad Ah

ARC Oo Olaha Daweynta Xanuunnada Indhaha Ka Fulisay Hargeysa

ARC Oo 3 Magaalo Ka Fulisay Ololaha Adeegyada Caafimaadka Oo Bilaash Ah

ARC Ayaa Deegaanka Dararweyne Ka Hirgelisay Ceel Biyood Ku Filan 50 Qoys

Qalab Loo Qaybiyey Arday Ka Qalinjebisay Mac-Hadka Farsamada Gacanta

Arday Ka Qalinjebisay Mac-hadka Xirfadaha Oo Makiinadaha Dawaarka Loo Qaybiyey

ARC oo Tababar Qallinka Casriga Ah Siisay Dhakhaatiirta Cisbitaallada Somaliland

Xarunta Kuweytiga Oo Bilawday Barnaamijka Barashada Af Carabiga oo Bilaash Ah

Wasiirka Awqaafta Iyo Arrimaha Diinta Oo Booqasho Ku Yimid Xarunta ARC

WASIIRKA CADAALADDA EE PUNTLAND OO KORMEERAY XARUNTA WAXBARASHADA AL-AMAL

Ardayda Xarunta Al-Amal Oo Dalxiis Iyo Socodaal Waxbarasho Loo Saaray

6 CEELBIYOOD OO LAGA QODAY MAGAALOOYIN KA MID AH DAWLAD-GOBALEEDKA HIRSHABEELLE

Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa dhammaystiray lix ceelbiyood oo ay ka qodday deegaanno ka mid ah magaalooinka Baladweyne iyo Jowhar ee dawlad-deegaanka Hirshabeelle. Ceelashan ayaa loo dhammaystiray kaabayaasha ay ka mid yihii daboolka sabadda ah, qalab-gacmeedka biyo soosaarka iyo dhismaha dararka Xooluhu ka cabbayaan, waxaana ka faa'idaysan doona in ka badan 300 oo qoys oo la qiyaasayo in tirada xubahoodu ay 1800 gaadhayso.

Qodaalka ceelashani waxa uu qayb ka yahay mashaariicda biyaha ee ay hay'adda ARC ka waddo deegaanno badan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in dadka saboolka ah laga kaalmeeyo helitaanka biyo nadiif ah, si looga badbaadiyo khatarta biyo la'aanta ee xilliyada abaaraha iyo caafimaad xumada ka dhalata biyaha.



15 QOYS OO LOOGA FAA'IIDEEYEY MASHRUUCA XOOGSI XALAAL AH

ARC ayaa lo' irmaan u qaybisay 15 ka mid ah qoysaska saboolka ah ee magaalada Balaweyne ee dawladgobaleedka Hirshabeelle. Qoys kasta waxaa la siiyey neeflo' ah oo irmaan, maqashiisana wata, si uu u dhaqdo, caanihiisana uga faa'idaysto cunto iyo iib uu dakhli ka helo labadaba.

Mashruuca qaybinta Xoolaha dhaqashada ah ayaa qayb ka ah, Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' ee ay hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ka fuliso Somaliland iyo Soomaaliya. Waa aanay ujeeddadiisu tahay in muwaadinka laga saaro xaaladda saboolnimo ee ku tiirsanaanta kaalmada, lana gaadhsiiyo xaalad uu yeesho waxsoosaar iyo il dakhli, taas oo kaalin ka qaadanaysa horumarka guud ee dhaqaalaha bulshada.



AGOONTA XARUNTA KUWEYTIGA OO LOOGA FAA'IIDEEYEY XOOLO SADAQAD AH



Laba neef oo geel ah ayaa loo qalay ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa, neefafkan oo ahaa gawracyo sunne ah oo ay bixiyeen samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt, waxaa hilikooda looga faa'ideeyey agoontan oo tiradoodu ay 300 tahay. Waa aanay qayb ka tahay mashruuca daryeelka caafimaad iyo nafaqaynta ardayda agoonta ah ee ay kafaala qaadday xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa.

Xarunta Kuweytigu waxa ay hoos timaaddaa hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo maalgelinta ka hesha hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma oo laga leeyahay dalka Kuweyt.

ARC OO OLAHA DAWEYNTA XANUUNNADA INDHABA KA FULISAY

Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa magaalada Hargeysa ka fulisay mashruuca la dagaalanka indha la'aanta iyo Daweynta cudurrada indhaba ku dhaca. Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo hay'adda hoos yimaadda ayaa 130 qof oo dadka ku noolxaafadda Daami ka mid ah, waxa uu lacag la'aan ugu sameeyey baadhis iyo daweyn indhaba ah, iyada oo 48 dadkaas ka mid ah oo xaaladahoodu adkaydnu loo gudbiyey xarunta cisbitaalka si loogu sameeyo qalliiin caadka indhaba lagaga jarayo. Ololahan oo ujeedadiisu ay tahay in kaalmo caafimaad la siiyo Bukaanka saboolka ah, waxa uu qayb ka yahay mashaariicda caafimaad iyo samafal ee ay hay'adda ARC ka fuliso guud ahaan Somaliland iyo Soomaaliya, waxaana taageero maaliyadeed siiya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt.



ARC OO 3 MAGAALO KA FULISAY OLOLAHA ADEEGYADA CAAFIMAADKA OO BILAASH AHHARGEYSA



Hay'adda ARC ayaa obole caafimaad oo bilaash ah ka fulisay magaaloyinka Hargeysa, Burco iyo Berbera. Cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa oo hay'adda hoos yimaadda ayaa kooxo dhakhaatiir iyo hawladeenno kale oo caafimaad isugu jira u kala diray saddexdan magaalo. Muddo laba maalmood ah ayaa ay dhakhaatiir ka kooban dhammaan takhasusyada kala duwani ay adeegyo caafimaad ka fuliyeen xaafadaha Sheedaha iyo Maxamed Mooke ee magaalada Hargeysa, waxaana ka faa'idaystay 547 muwaadiniin ah, iyada oo kooxaha caafimaad ee loo diray magaaloyinka Burco iyo Berbera ay iyaguna adeegyo caafimaad u qabteen 503 muwaadin.

Dhakhaatiirta ayaa xaaladaha culus ee dadkan ay adeegyada siinayeen oo 1050 wadartoodu ahayd, waxa ay u gudbiyeen xarunta cisbitaalka caalamiga ah, si lacag la'aan loogu qabto baadhista iyo daweynta dheeraadka ah ee ay u baahan yihiin.

Ololayaasha caafimaad ee noocan ah ayaa qayb ka ah Barnaamijka samafalka caafimaadka ee ay hay'adda ARC ka fuliso guud ahaan deegaannada kala duwan ee Somaliland iyo Soomaaliya. Waxa aanay ujeeddadiisu tahay in Bukaanka saboolka ahi uu daweynta xaaladdiisa helo waqtiga ku habboon.



ARDAY KA QALINJEBISAY MAC-HADKA XIRFADAHA OO MAKIINADAHA DAWAARKA LOO QAYBIYHEY



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa ceelbiyood ka qodday deegaanka Dararweyne ee woqooyiga bari ee magaalada Hargeysa. Ceelbiyoodkan oo joggiiisu dhan yahay 10 mitir, waxaa la socda dhismaha daboolka sare oo sabbad ah, darar dhisan oo loogu talagalay waraabka Xoolaha iyo qalab gacmeedka biyaha lagaga soo saarayo.

Ceekani waxa uu awood u leeyahay in uu daboo-

lo baahida biyood ee ku dhowaad 50 qoys oo degaanka ah. Wuxuu aanu qayb ka yahay mashruuca biyaha ee ay hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo Somaliland iyo Soomaaliya ah, iyada oo ay ujeeddadu tahay in la yareeyo dhibaatada biyo la'aanta ah ee xilliyada abaarahaa soo foodsarta qoysaska saboolka ah.

QALAB LOO QAYBIYEY ARDAY KA QALINJEBISAY MAC-HADKA FARSAMADA GACANTA



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo taageero maaliyadeed ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee Al-Raxma, ayaa 50 shandadood oo qalabka farsamada gacanta ah (Tool) u qaybisay arday ka qalinjebisay mac-hadka farsamada gacanta iyo xirfadaha ee xarunta Kuweytiga magaalada Hargeysa. Mashruucan oo qayb ka ah Barnaamijka Xoogsi xalaal ah, ujeeddadiisu waa in muwaadinka loo diyaariyo suuqa shaqada ee dihin, iyada oo waxbarashada loo raacinayo qalabkii uu ku shaqaynayey.

ARC yoolkeeda mashruuca xoogsi xalaal ahi waa in ay kaalinteeda ka qaadato dadaallada shaqo abuurka iyo koboca dhaqaalaha ee dalka. Sidaas awgeed waxa ay magaaloojin kala duwan ka hirgelisay, Mashaariic horumarineed oo ay ka mid yihiin mac-hadyada farsamada gacanta oo sannad kasta soo saara tiro badan oo xirfadlayaal ah, kuwaas oo gacan ka geysta in nolosha qoysaskooda ay ka saaraan xaaladda ku tiirsanaanta caawimada, kana qaybqaataan koboca dhaqaale ee dalka.

ARDAY KA QALINJEBIYEY MAC-HADKA XIRFADAHA OO MAKIINADAHA DAWAARKA LOO QAYBIYEY

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa Makinadaha dawaarka u qaybisay 20 hablood oo ka Qalinjebiyey mac-hadka xirfadaha ee Kuweytiga oo hoos yimaadda hay'adda Gargaarka Afrika - ARC. Tababarkan oo ujeeddadiisu ahayd in Haweenka laga caawiyo xirfado dhaqaale abuur oo u suurtageliya in ay kaalin ka qaataan daboolista baahiyaha dhaqaale ee qoysaskooda.

Mashruucan oo lagu magacaabo 'Irbaddaya ayaa xirfaddaya ah' waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' oo ay hay'adda ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo Somaliland iyo Soomaaliya ka mid ah, kaas oo ay ujeeddadiisu tahay xoojinta koboc dhaqaale oo qofka saboolka ahi uu kaga gudbo xaaladda ku tiirsanaanta kaalmada, isaguna uu qayb ka noqdo waxsoosaarka dhaqaale iyo shaqo abuurka.

Mashruuca tababarka xirfadaha tolamaha iyo nashqadaha dharka waxaa fulintiisa iyo maamulkisaba leh hay'adda Gargaarka Afrika - ARC, waxa aana maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo dalka Kuweyt laga leeyahay.



ARC OO TABABAR QALLIINKA CASRIGA AH SIISAY DHAKHAATIIRTA CISBITAALLADA SOMALILAND



Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeisa International ayaa tababar heerkiisu sarreeyo siiyey dhakhaatiirta qalliinka ee ka hawlgala cisbitaallada waaweyn ee Somaliland. Tababarkan oo lagu qabtay xarunta cisbitaalka Hargeysa International, waxaa lagu baranayey habka qalliinka aan dillaaca weyn lagu samaynayn maqaarka ee Laysarka oo loo yaqaanno 'Laparoscopy'. Tababarkan oo socday muddo laba toddobaad ah, waxaa bixinayey Professor Dr. Midxat Caasim oo aqoon durugsan iyo waayoaragnimo dheer u leh qalliinada Laysarka, kana tirsan barayaasha sare ee jaamacadda Al-Qaahira ee dalka Masar.

Dr. Yaasir Darwiish, maamulaha cisbitaalka Hargeysa International oo ka hadlay furitaankii ayaa sheegay in dhakhaatiirta muwaadiniinta iyo carabta isugu jiray ee tababarkan la siiyey ay ka mid yihiin, kuwa ugu heerka sarreeya dhinaca qalliinka jidhka la furo (Open Surgery), waxaa aanu u rajeehey in tababarkani uu u ibo fur u noqon doono, faham dheeraad ahna uu ka siin doono qalliinka Laysarka oo ah habka ugu casrisan ee hadda dunida laga isticmaalo.

Dhinaca kalana dhakhtarka tababarka bixinaya oo furitaankii hadal kooban ka jeediyey, waxa uu ballan-qaaday in dhakhaatiirtan uu bilow fiican ka siin doono qalliinka Laysarka, isla markaana uu tunsi doono muhiimadda uu leeyahay, kuna beeri doono xiisaha dhiirrigelinaya in barashadiisa ay sii wadaan.

Dhakhaatirita tababarka la siinayo ayaa iyaguna dhinacooda soo dhoweeyey tababarkan, waxa aanay bogaadiyeen fursaddan qiimaha badan ee uu siiyey cisbitaalka International.

Marka laga tago adeegyada caafimaad ee uu bixiyo cisbitaalka Hargeisa International, waxa uu sida oo kale tababarro caafimaad siyyaa dhakhaatiirta iyo guud ahaan mihnadlayaasha caafimaadka ee Somaliland. Cusbitaalka oo ay yaallaan qaar ka mid ah qalabyada caafimaadka ee dunida ugu casrisan, kana hawlgalaan 12 takhasus, waxa uu ka mid yahay mashaariicda caafimaad iyo samafal ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka fuliso Somaliland iyo guud ahaan deegaannada Soomaalida ee Geeska Afrika.

XARUNTA KUWEYTIGA OO BILAWDAY BARNAAMIJKA BARASHADA AF CARABIGA OO BILAASH AH



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa bilowday barnaamij lacag la'aan dadka lagu barayo Afka carabiga. Barnaamijkan oo ku dhawaaqistiisa lagu beegay xuska maalinta caalamiga ah ee Af carabiga, waxaa laga hirgelin doonaa xarumaha waxbarashada Kuweytiga ee magaaloooyinka Hargeysa, Burco, Boorama, iyo Garoowe.

Waxaa lagu bilaabay 80 arday oo heerarkooda aqoonta afku ay kala duwan tahay, kuwaas oo la siinayo casharro

yo tababarro loogu talagalay barashada Af carabiga ee dadka aan ku hadal. Dhinaca kalana xarumaha dugsiyada Kuweytiga ayaa bilaabay barnaamijyo ardayda wax ka barata lagu dhiirrigelinayo barashada Af carabiga oo ah luuqadda Qur'aanka Kariimka ah.

Xarumaha Kuweytigu waxa ay hoostagaan hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo ka wakiil ah hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA - Kuweyt.

WASIIRKA AWQAAFTA IYO ARRIMAHADIIINTA OO BOOQASHO KU YIMID XARUNTA ARC

Guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa xarunta hay'adda ku soo dhoweyey wasiirka Awqaafta iyo arrimahadiiinta ee Somaliland Mudane Sheekh Cabdirisaq Xuseen Cali (Albaani) oo booqasho ku yimid xarunta. Guddoomiyaha ayaa wasiirka iyo masuuliyyiin la socday waxa uu kormeer ku soo mariyey, xafiisayada xarunta hay'adda iyo qaybaha hoos yimaadda oo ay ka mid yihiin xarunta waxbarashada ee Kuweytiga, beerta Al-Raxma iyo hoyga agoonta.

Ujeeddada booqashada wasiirka ayaa ahayd in maamulka sare ee ARC ay ka wada hadlaan hababka iskaashi ee ay ka yeelan karaan mashaariicda iyo Barnaamijiyada kala duwan ee ARC ay fuliso, kuwooda soo gelaya hawlah shaqo ee wasaaradda. Wasiirku waxa uu maamulka hay'adda uga mahadnaqay soo dhoweyntooda, isaga oo dhinaca kalana bogaadiyey dadaalka ay ARC geliso adeegyada samafal iyo horumarineed ee wuxtarka u leh muwaadiniinta.



LATALIYAHADDA MADAXWEYNAYADA JSL OO BOOQASHO KU YIMID XARUNTA KUWEYTIGA



Mudane Cabdinajax Siyaad Aw Cabdi, Lataliyahadda madaxweynaya Jamhuuriyadda Somaliland ee arrimaha dhalinyarada ayaa booqasho u kuurgelis iyo ka war helis ah ku yimid xarunta waxbarashada Kuweytiga ee magaalada Hargeysa. Mudane Cabdinajax waxa uu kormeer ku soo maray fasallada heerarka kala duwan ee dugsiyada Kuweytiga qaybaha Hablaha iyo wiilasha, goobaha waxbarashada iyo tababarka ee mac-hadyada farsamada gacanta iyo xirfadaha, qaybta jiifka ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo xarunta, beerta iyo waxsoosaarka xarunta iyo guud ahaan qaybaha kala duwan ee xarunta Kuweytiga. Lataliyahadda waxaa xarunta ku soo dhoweyey mudane Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika - ARC, madaxa mashaariicda waxsoosaarka ee ARC mudane Xuseen Almutawalli iyo maamulaha dugsiga sare ee xarunta waxbarashada Kuweytiga mudane Xasan Muuse. Masuuliyyiintan ayaa lataliyahadda xog iyo faahfaahin ka siiyey sida ay u shaqeeyaan qaybaha kala duwan ee uu booqday. Lataliyahadda ayaa isaguna dhankiisa bogaadiyey mashaariicda samafal iyo horumar ee ay hay'adda ARC ka waddo guud ahaan dalka, isaga oo si gaar ah hoosta uga xariiqay muhiimadda mashruuca waxbarashada iyo daryeelka agoontu uu dalka u leeyahay.

WASIIRKA CADAALADDA EE PUNTLAND OO KORMEERAY XARUNTA WAXBARASHADA AL-AMAL

Wasiirka dastuurka iyo caddaaladda ee dawladda Puntland, mudane Muxamed Cabdalwahaab ayaa kormeer ku tegey xarunta Al-Amal ee magaalada Garowe oo hoos tagta hay'adda Gargaarka Afrika - ARC. Wasiirka oo uu la socday wasiir ku xigeenka wasaaradda Dr. Muxamed Cali Faarax, iyo xubno ka tirsan wasaaraddiisa ayaa soo kormeeray qaybaha kala duwan ee xarunta, waxa aanu u kuurgalay xaaladda nololeed iyo daryeel ee la siiyo ardayda agoonta ah ee xarunta wax lagu baro laguna daryeelo, gaarahaantayada waxbarashada iyo daryeelka caafimaad, cunto iyo jiif ee la siiyo.

Wasiirka iyo masuuliyyiinta booqashada ku wehelinaysay ayaa masuuliyyiinta kala duwan ee xarunta ka dhegeystay yogaha iyo Faahfaahinta hannaanka shaqo ee xarunta. Waxa aanu wasiirku bogaadiyey adeegyada samafal iyo daryeelka ee ay xaruntani lacag la'aanta ah ku bixiso. Dhinaca kalana waxa uu



ARDAYDA XARUNTA AL-AMAL OO DALXIIS IYO SOCODAAL WAXBARASHO LOO SAARAY

Xarunta waxbarashada Al-Amalee magaalada Garoowe ayaa socdaal dalxiis iyo maweelo ah u saartay ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo. Munaasabadda u dabbaaldeegga dhammaysashada nuska hore ee sannad dugsiyedka -2022 2023 awgeed, xarunta Al-Amal ayaa ardaydan oo tiradoodu ay tahay 86 agoon ah waxa ay geysay beerta maaweeleida iyo ciyaarta Carruurta ee AJJ.

Ciyaaro kala duwan, maaweelelo iyo aqoonkorodhsu dhinaca dhaqanka ah ayaa ay ardaydani ku dhammaysteen dalxiiskan. Barnaamijkan ayaa qayb ka ah qorshayaasha maaweeleinta iyo kobcinta garaadka ardayda agoonta ah ee lagu daryeelo xarumaha ay maamusho hay'adda ARC.



DEFINITION OF THE QUALITY SYSTEM:

A global system issued and updated by the World Organization for Standardization, a global union based in Geneva, and ISO is a set of requirements that are met by bodies, institutions, companies and organizations, to then subject the entity to an audit process to ensure that it meets the requirements in the light of which the quality certificate is granted to the target party

The importance of the quality system:

First: The Foundation

- Contributes to increasing the institution's competitiveness, improving the reputation of the institution, and obtaining the confidence of donors and suppliers.
- Raising the operational efficiency of the entity by improving its operations and increasing the productivity of employees.
- Clarity in the responsibilities and powers for employees in the institution, which helps in the formation of clear and specific work policies.
- Improving performance in the decision-making process by providing senior management with the information they need for sound decision-making based on

internal audits and proper documentation of data.

- Achieving continuous improvement of quality and operations of the institution as a whole by documenting corrective actions that prevent errors before they occur.
- Measuring the performance of the administrative processes of the institution to enable it to improve performance.
- Developing the administrative, productive and operational process by monitoring it at all stages and studying the problems that accompany it with modern scientific methods

Second: Employees

- Contributes to raising the morale of employees by raising their efficiency through guidance, training, and developing their personal capabilities, which reflects positively on their production
- The quality system gives workers the ability to control their production and administrative processes and enables them to identify and plan tasks and other methods to obtain correct results.
- Allows employees to have a clear vision of their roles and ob-

jectives required to enable them to raise their production and improve the quality of their performance

- Develop a culture of quality in the institution, create a better work atmosphere, and strengthen cooperation and communication between different employees
- Reducing job friction between employees due to the clarity of powers and responsibilities for all levels
- Employees are allowed to express their opinions and observations and encourage the submission of improvement and development proposals in a way that contributes to the development of various administrative processes
- Develop a sense of belonging to employees as a result of their involvement in all stages of building the system and developing their organization
- Works on the exchange and transfer of experience between competencies within the entity by documenting all methods and methods of work for all administrative levels.



لجنة أفريقيا للإغاثة

AFRICAN RELIEF COMMITTEE

أثر .. يبقى

[@africanreliefco](#)

الмарأة
فريدة CHARITABLE
PATHS
